

# Macluumaad ku saabsan sida Anticimex u shaqaynayso dhanka faayraska karoona

Iminka waxaa jira su'aalo badan iyo wel-wel la xiriira baahida faayraska karoona. Anagayaga ah Anticimex waxaanu raacaynaa Hey'adda arrimaha caafimaadka iyo dawlada go'aamadooda iyo talooyinkooda, wixi caawimaad ah ee aan ka gaysan karno in la yareeyo khatarta faafinta cudurka waany samaynaynaa. Isla markaa waxaanu sida ugu fiican ee suurtagal ah aanu diyaar ugu ahaano macaamiishayada u baahan caawimaad. Sidaas darteed way soconaysaa shaqadayadu laakiin waxaanu qaadanay talaabooyin loogu talagalay in lagu yareeyo khatarta cudur faafinta.

## Anticimex way sii wadaysaa hawsha shaqadeeda oo diyaar ayaan u nahay macaamiishayada sida ugu fiican ee suurtagal ah

Anticimex waxay qaadatay dhowr talaabo si loo yareeyo khatarta cudur faafinta, yaraynta wel-welka iyo isla mar ahaantaas loo fuliyo in la booqdo macaamiisha u baahan caawimaadayada. Xaalada iminka lagu jiro talooyinka hey'addaha dawladeed waa in dadka ay ku soo baxaan calaamado cudur ay iska ilaaliyaan xiriirka bulsho. Anticimex waxay u hogaansamaysaa arintan iyadoo ku baraarujinaysa shaqaalahayada leh calaamad cudur inay joogaan guriga sida ku cad talooyinkaas.

Halkan hoose ayaad ka akhrin kartaa sida aanu samaynayno marka la booqanayo macaamiisha.

## Maxaan anigu filan karaa haddii aan lahaa booqasho ballansanayd?

Talaabooyin iyo qaabab la raacayo oo cusub oo ku meel gaar ah ayaa la dhaqan-geliyay si loo yareeyo khatarta infekshan ku yimaada shaqaalahayaga iyo adigaaga ah macmiil.

- Shaqaalahayaga waxay u feejigan yihiin dhanka nadaafada gacmaha ee wakhtiga u dhaxeeya booqashada macmiil kasta
- Shaqaalahayagu waxay iska ilaalinayaan inay gacanta kugu salaamaan adigaaga ah macmiil
- Shaqaalahayagu meel durugsan ayay istaagayaan marka aanu albaabka soo garaacno oo waxaanu sugaynaa in qof naga furo. Masaafu ah hal mitir ama ka badan waxaysi macno weyn leh u yaraynaysaa khatarta cudur faafinta dhibcaha ah.

Waa muhiim in xitaa macaamiishayadu ixtiraamaan nidaamkan aanu raacayno dhanka arintan si aynu u awoodno iska ilaalinta cudur faafinta. Waxaanu dadka oo dhan ku baraarujinaynaa inay akhristaan wararka cusub ee ku qoran bogga intarnatka ee Hey'adda arrimaha caafimaadka [www.folkhalsomyndigheten.se](http://www.folkhalsomyndigheten.se)

## Maxaan samaynayaa anigayga ah macmiil haddii aan ay ii balansantahay booqasho ah Anticimex laakiin aan xanuusanayo ama ku jiro karantiimo?

Haddii adigaaga ah macmiilka aad guriga u joogto karantiimo ama aad leedahay calaamado cudur waxaanu kaa codsanaynaa inaad noo soo sheegto sida ugu dhakhsaha badan si aanu dib ugu dhigno booqashada macmiilka ilaa ka dib wakhtiga xanuunkaaga ama wakhtiga karantiimadu kuu dhamaanayso.



### Waxaanu halkan u joognaa waa adiga

Waxaanu halkan u joognaa in adiga aanu ku caawino. Adigu waxaad nagala soo xiriir kartaa 075-245 10 00 ama dhanka Messenger ee Facebook haddii aad hayso su'aalo ku saabsan arin kuu socota ama ku saabsan adeegyadayada. Adigu waxaad xitaa buuxin kartaa foomkayaga xiriirka oo markaas anaga kula soo xiriirayna sida ugu dhakhso badan ee aanu awoodno.